



Diyaar ma tahay?

– haddii ay dhacdo jirto ama dagaal



Waxaan si wadajir ah u xoojineynaa adkeysiga waxaana ilaalineynaa xoriyadeena

| | |
|---|----|
| Ku socota dadka degan Is-maamulka Borlänge | 3 |
| Sida loo helo xog haddii ay dhacdo dhibaato ama dagaal | 4 |
| Waxa uu is-maamulku qabto inta lagu jiro xiliga qalalaasaha bulshada | 5 |
| Nidaamyada digniinta – sida lagugu ogeysiiyo xaalad khatar ah | 6 |
| Meelaha la isugu yimaada ee loo qoondeeyey | 8 |
| Qaariidada muujinaysa dhibcaha xogta loo qoondeeyay | 9 |
| Maxaa ka dhici kara Borlänge? | 10 |
| Dhibaatooyinka biyaha la cabbo | 11 |
| Khatarta sii deynta walxaha halista ah | 12 |
| Biyo badan oo qulqulaya iyo biya xireenka oo xumaaday | 13 |
| Waa sidee xaalada difaaca guud ee Iswiidhan? | 14 |
| Loogu talagalay dadka baahiyaha gaarka ah qaba | 16 |
| U diyaarsanaantaada iyo u diyaargarowgaaga maskaxeed | 18 |
| Faahfaahinta xogta xiriirka | 19 |

Ku socota dadka degan Is-maamulka Borlänge

Buug-yarahaan waxaa loogu talagalay qof kasta oo ku nool Is-maamulka Borlänge wuxuuna ka kooban yahay macluumaad khuseeya haddii ay dhibaato jirto ama dagaal. Ujeeddadeedu waa in ay kordhiso aqoontaada oo ay kaa caawiso in aad u diyaargarowdo haddii ay dhacdo wax aan la malayn karin.

Adduunyada aan la hubin, waxaa muhiim ah inaan dhammaanteen ilaalino diyaargarowgaowga, maskax ahaan iyo ficil ahaanba. Sidan marka aan sameyno, waxaan isku taageeri karnaa oo aan gacan ka geysan karnaa sii wada shaqeynta bulshada.

Ujeedada buug-yarahan waa in lagu siiyo dammaanad iyadoo uu ku siinaya macluumaad iyo tilmaamo ku saabsan waxa khuseeya haddii ay dhacdo lama filaan ah, ama halkan Borlänge ama adduunka ku xeeran. Buug-yarahaagu waa xog dheeraad ah oo loogu talagalay daabacaadda qaranka Haddii dhibaato ama dagaal yimaado, oo ay soo saarto Hay'adda Gurmadka Madaniga ah (MSB).


Waa maxay dhibaato?

Dhibaataadu waa dhacdo dhacda wakhtiyada nabada jirto waxayna

sababtaa khalkhal bulsho oo saameeya dad badan. Waxa laga yaabaa inay ku lug yeelato wax kasta laga bilaabaayo korontada iyo biyaha oo go'an ilaa cimilo aad u daran ama weeraro argagixiso. Dhibaatooyinku waxay badanaa u dhacaan si lama filaan ah waxayna keeni karaan cawaaqib xumo.

Xog been abuur ah

Inta lagu jiro muddada qalalaasaha iyo dagaalka, khatarta xog beenta ah ama marin-habaabinta ah ayaa korarta. U fiirso ilahaaga oo kaliya oo ku tiirsanow macluumaadka ilaha aad aaminsan tahay sida kuwa maamulka iyo xarumaha wararka. Ha faafin war been abuur ah. Si aad u hesho xog dheeraad ah, booqo Hay'adda Difaaca cilmi nafsiga ee: mpf.se.



Tallo!

Dhig buug-yarahaan meel ammaan ah si aad si fudud ugu heli karto haddii aad u baahato!

Sida loo helo xog haddii ay dhacdo dhibaato ama dagaal

Haddi ay dhacdo khalkhal bulsho ama shil wayn, Is-maamulka ayaa kusoo wargelin doono waxuu ku saabsan yahay waxa dhacaya, waxaad samayn karto, iyo meesha aad ka heli karto xog dheeraad ah.

Kanaal yada gudbiya xogta Is-maamulka:

- Wabseydka internetka ee Is-maamulka borlange.se.
- Kala soco Bogga Facebook-ga ee Is-maamulka Borlänge – warar degdeg ah oo ku saabsan dhacdooyinka waqtigan jiri kara.
- Is-maamulka Borlänge meelaha la isugu yimaado – ka fiiri bogga 8 ee buug-yarahan iyo borlange.se.
- Haddii aad su'aalo qabtid ku soodir iimayl kan kommun@borlange.se (ogow in jawaabaha laga yaabo in ay soo daahaan inta lagu gudo jiro shilalka waaweyn).
- Ka wac nambar kaas Is-maamulka Borlänge 0243-740 00 wixii su'aalo dheeraad ah qabtid, xog, ama talo ah (kaliya haddii loo baahdo, si aad uga fogaato culeyska xad-dhaafka ah ee intarneedka).



Kanaal yada gudbiya xogta qaranka:

- Sveriges Radio P4 Dalarna, inta jeer ee 95.9-103.4 MHz – raadiyaha bulshada iyo qayb ka mid ah nidaamka u diyaargaroowga ee Iswiidhan. Xilliyada qalalaasaha, shilalka waaweyn, ama dagaalka, P4 waxay baahisaa xog muhiim ah oo ka socoto maamulka.
- SVT iyo bogga Teletext 100 waxay bixiyaan xogta hadda jirta.
- Krisinformation.se waxay soo ururisaa xogooyin la xaqiijiyay ee maamulka waxaana sidoo kale la heli karaa si app ahaan ah.
- App-ka 112 ee ka socda SOS Alarm waxa uu ku siinayaa warbixin ku saabsan dhibaatooyinka ka dhaca agagaarkaaga, sida dabka, shilalka gaadiidka, iyo warbixinaha kale ee dhibaatooyinka ah.
- Wac lambarka xog heynta qaranka ee Iswiidhan 113 13 si aad u hesho warbixin ku saabsan dhibaatooyinka ama shilalka.

XusumaNOW!

Raadiyaha batariga ku shaqeeyo ayaa damaanad qaadayo inaad mar walba heli karto xogta muhiimka ah!

Waxa uu is-maamulku qabto inta lagu jiro xiliga qalalaasaha bulshada

Haddii ay jirto dhibaato ama qalalaaso oo bulshada dhexdeeda ah, Is-maamulka Borlänge waxaa laga doonayaa in ay si degdeg ah wax uga qabtaan, iskuna duba riddo, iyo in ay hubiyaan in dadka deegaanka ay heleen gargaar degdeg ah iyo wixii xog ah oo ay u baahan yihiin. Hadafku waa in la ilaaliyo amaanka dadka lana hubiyo in hawlaha muhiimka ah ee bulshada ay sii shaqeeyaan.

Masuuliyadda deegaanka ee juqraafiyeed

Is-maamulka ayaa mas'uul ka ah qorsheynta, diyaarinta, isku dubaridka, iyo in ay wargeliyaan gudaha deegaankeeda. Taas macneheedu waxa weeyaan in ay qasab tahay Is-maamulku ay u abuuraan shuruudo jilayaasha kala duduwan – sida maamulka, shirkadaha, iyo ururada iskood wax u qabsada – si ay waxtar leh ula shaqeeyaan.

Unugga u diyaargarowga iyo ilaalinta shacabka

Is-maamulka Borlänge waxeey lee dahay qeyb gaar ah oo ka shaqeysa arrimaha la xiriira diyaargarowga iyo ilaalinta shacabka. Unuggu waxa ay qorsheeyaan, iskuna duba ridaan, oo ay taageeraan hawlaha is-maamulka si loo hubiyo in ay diyaar yihiin marka ay dhacdo wax lama filaan ah.

Maareynta dhibaatooyinka kajiro Is-maamulka

Haddii ay dhacdo dhibaato halis ah oo saamaysay bulshada, Is-maamulku wuxuu hawlgeliyaa ururkiisa gurmada. Tani waxay ka dhigan tahay in kooxda gaarka ah ee maareynta qalalaasaha ay shireen si ay go'aano degdeg ah uga gaadhaan, iskuna dubaridaan tallaabooyinka, si ay u xalliyaan xaaladaha.



Nidaamyada digniinta – sida lagugu ogeysiyo xaalad khatar ah

Haddii ay dhacdo dhibaato halis ah, waxaa lagugu ogeysiin doonaa raadiyaha, TV-ga, taleefanka gacanta, iyo/ama nidaamka digniinta dibadda ee Iswiidhan, oo sidoo kale loo yaqaano "Hesa Fredrik".

Ogeysiinta Dadweynaha ee Muhiimka ah (VMA) – oo loo isticmaalo wakhtiga nabadda

Tani waxaa loo isticmaalaa in si degdeg ah loogu digo bulshada looguna wargeliyo dhacdooyinka halista ah ee khatar gelin kara noolasha, caafimaadka, hantida, ama deegaanka – tusaale ahaan, qiiq sun ah oo ka yimaada dabka, gaas daadanaya, ama cimilada daran.

Sida VMA kuu soo gaadhi karto:

- Raadiyaha iyo TV ga (gaar ahaan Sveriges Radio P4).
- SMS iyo ogaysiisyada kasocdo maamulka.
- Seeriyadaha dibadda – "Hesa Fredrik".

Marka VMA laga sii daayo "Hesa Fredrik," calaamaduhu waxay dhawaaqaan 7 ilbiriqsi, oo ay ku xigto 14 ilbiriqsi oo aamusnaan ah, oo soo noqnoqonaya 6 jeer. Muddada guud waa 2 daqiiqo.



7

14

7

14

7

14

ilbiriqsi

Haddii aad maqasho dhawaaqa dhigniinta:

- Gudaha gal.
- Xir dhammaan albaabada iyo daaqadaha oo dami hawo-mareennada iyo marawaxadaha haddii ay suurtagal tahay.
- Dhageyso Sveriges Radio P4 ama ka daawo SVT wixii macluumaad ah ee ku saabsan waxa dhacay.
- Raac tilmaamaha ay bixiyaan mas'uuliyiinta maamulka.



Hesa Fredrik


Habka digniinta dibadda waxaa uu leeyahay afar calaamadood oo kala duwan: VMA, alaarmiga degdega ah, digniinta duulaanka hawada, iyo "dhammaan cad".

Nidaamka waxaa la tijaabiyaa afar jeer sannadkiiba – maalimaha Isniinta ugu horreysa ee aan fasaxa ahayn ee bilaha Maarso, Juun, Sebteembar, iyo Diseembar saacada markay tahay 3:00 pm.

Qeylo dhaan degdeg ah – oo loo isticmaalo wakhtiga dagaalka

Taas waxaa la adeegsadaa marka ay dowladdu shaaciso in uu jiro khatar dagaal ama in dalku uu dagaal ku jiro.

Seeriga ayaa dhawaaqaa 30 ilbiriqsi, waxaana ku xigaa 15 ilbiriqsi oo aamusnaan ah. Habkani wuxuu socdaa mudo 5 daqiiqo.

 30 15 30 15 30 15 ilbiriqsi


Haddii aad maqasho dhawaaqa dhigniinta:

- Gudaha gal oo dhegayso Sveriges Radio P4.
- U diyaar garoow inaad si dhakhso leh uga baxdo gurigaaga haddii loo baahdo.
- Iska ilaali inaad samayso wicitaano telefoon – khadka mobilada ayaa looga baahan yahay isgaarsiinta muhiimka ah.
- Hubi meesha hoyga kuugu dhow uu ku yaal.

Digniinta duulaanka hawada – oo loo isticmaalo xilliga dagaalka

Tan waxaa la isticmaalaa haddii ay jirto wax khatar degdeg ah oo ka imanaya hawada, sida weeraryada hawada.

Seeriga ayaa dhawaaqa 2 ilbiriqsi, waxaana soo raaca 2 ilbiriqsi oo aamusnaan ah. Habkaan wuxuu socdaa ilaa 1 daqiiqo.

 2 2 2 2 2 2 2 2 2 ilbiriqsi

Haddii aad maqasho dhawaaqa dhigniinta:

- Isla markiiba raadso hooy – hoyga difaaca madaniga ah ee kuugu dhow, ama meel kale oo la ilaaliyo sida maqsin ama qol aan daaqado lahayn.
- Dhageyso Sveriges Radio P4 ama lasoco warbixinada wararka.
- Joogta hooyga ilaa aad maqasho calaamada "waad bixi kartaan".

Calaamadda “xaaladu waa caadi”

Marka ay khatartu dhamaato, seeri joogto ah oo soconaysa 30 ilbiriqsi ayaa la dhawaaqaa.

 30 ilbiriqsi



Meelaha la isugu yimaada ee loo qoondeeyey

Meesha loogu talagalay in la isugu yimaado waa goob ay dadka deggan Borlänge u soo jeesan karaan si ay warbixin u helaan, taageero iyo kaalmo uga helaan is-maamulka haddii ay dhacdo halis ah ama dhibaato timaado. Ujeeddadu waa in la bixiyo meel nabad galiyo ah oo la isku duwo marka hawlaha caadiga ah ee bulshadu aanay shaqaynayn.

Haddi isgaarsiin joogta ah, sida taleefanada, ay shaqada joojiso ama haddii degmadu ay ku farto, waxaad aadi kartaa goob loogu talagalay in lagu kulmo. Tusaalooyinka waxa aad halkaas ka heli karto waxaa ka mid ah:

- Xogta hadda.
- Ku dalicida khidmada taleefanada gacanta iyo gelitaanka Wi-Fi.
- Meel diiranaan leh.
- Biyo la cabbo iyo cunto fudud haddii loo baahdo.

i Xog ku saabsan goorta iyo meelaha loo qoondeeyey in la furo meelaha la isugu yimaado waxaa lagu bixin doonaa bogga degmada, bogga Facebook, Sveriges Radio P4, ama kanaalada kale ee macluumaadka.



XUSUUSNOW!

Haddii aad ku maarayn karto guriga, joog halkaas oo la soco wixii soo kordha ilo xog lagu kalsoonaan karo.

Degmada Borlänge waxay leedahay labo nooc oo ah goobo loo qoondeeyay in la isugu yimaado: goobaha warbixinta iyo meelaha la iskugu yimaado oo leh adeegyo la balaariyay.

Qodobbada warbixinta

Meelo caan ah oo dad badan oo deggani hore u yaqaaniin; Soo dhawaynta Shirka Magaalada, Maktabadda, iyo soo dhawayntii Tunabyggen ee Hushagen. Kuwani way furan yihiin maalintii waxayna bixiyaan xog hadda jirta.

Goobaha la isugu yimaado ee mobilada oo leh adeegyo la dheereeyey

Haddii xaaladdu u baahan tahay taageero dheeraad ah meel gaar ah, is-maamulka Borlänge waxay sameyn doontaa teendhooyin samatabbixin oo waaweyn oo furan inta badan habeen iyo maalin. Tani waxay suurto gal ka dhigaysaa in la helo caawimo ku dhow meesha loo baahan yahay.

Akhriso wax badan oo ku saabsan meelaha loo qoondeeyay isu imaatinka borlange.se/samlingsplatser



Gaariidada muujinaysa dhibcaha xogta loo qoondeeyay



Soo dhawaynta
Tunabgen
Utanforsvägen 2

Shirka magaalada
Röda vägen 50

Maktabadda
Sveagatan 5

Ogow!
Goob guur-guura ayaa la
samayn doonaa meelaha ay
dhibaataadu sida aadka ah u
saamaysay.

Maxaa ka dhici kara Borlänge?

Is-maamulka Borlänge waxay si joogto ah u falanqaysaa khataraha iyo dayacaada ka jira is-maamulka. Falanqaynta ayaa muujinaysa tallaabooyinka loo baahan yahay si loo xoojiyo awoodda degmada si ay wax uga qabato dhacdooyinka aan loo baahnayn. Waxaad ka heli kartaa falanqaynta iyo khataraha la aqoonsaday bogga degmada.

Koronto la'aanta

Koronto la'aantu waxay ku dhici kartaa sababo badan oo kala duduwan, sida duufaanno ama halaab, waxayna socon kartaa muddo gaaban ama dheer.

Talooyin ku saabsan waxaad samayn karto:

- Kadhig frinjeerkaga iyo qaboojiyahaaga mid xidhan intii ay suurtoagal ah si aad qabowga u ilaaliso.
- Ku dabool albaabbada, daaqadahaga, iyo daldaloolada bustayaalka ama maro si kulaylka loogu hayo gudaha.
- Joog meel yar ama ku seexo dhowr qof oo isku qol ah si aad u ilaaliso diirimaadka. Si kooban hawo u geli si aad u keento ogsijiinta.
- La hadal deriska, asxaabta, iyo qoyska si aad u ogaato haddii ay u baahan yihiin caawinaad oo dhinac kasto ah.

Xusuusnow!

Ha shidin dhammaan korontada iyo kuleyliyaha hal mar ka dib korontadu go'do. Haddii qof kastaa sameeyo sidaan, shabaqyada ayaa laga yaabaa inay buux dhaafiyaan, taasoo keeni karta koronto la'aan cusub.

Waxyaabaha wanaagsan ee lagu hayo guriga:

- Raadiyaha ku shaqeeya batariga iyo talefoonka gacanta oo leh alaad wax lagu jaargareeyo.
- Nalalka shaaha, shumacyada, iyo taraqa.
- Toosh ama laambad.
- Bustayaal iyo dhar diiran.
- Shoolad xero leh shidaal ama barbecue leh dhuxul.
- Cunto leh cimri dheer.

Wax badan ka sii akhri:
msb.se
energimyndigheten.se

Iiis hubin dheer ayaa laga heli karaa msb.se



Dhibaatooyinka biyaha la cabbo

Biyuhu waa kheyraadkeena ugu muhiimsan, iyo biyo la'aantuna waa mid aad u xun. Shilalka, burburka, korontadu go'do, ama carqalado kale awgeed, biyaha la cabbo ee aaggaaga waxaa laga yaabaa inay wasakhoobaan ama gebi ahaanba baaba'aan.

Haddi ay dhacdo in biyaha la cabbo ay waqti dheer go'aan, degmada Borlänge waxa ay ku siin kartaa haamo biyo ah iyo taayirro meelaha loogu tala galay, sidoo kale waxa ay siin kartaa goobo biyaha laga cabo oo furan oo aad biyaha kasoo dhaansan karto. Xasuusnoow inaad weli u baahan tahay in biyaha guriga lagu keydiyo. Qofka qaangaarka ah wuxuu u baahan yahay 3-5 litir oo biyo ah maalintii, ugu horrayn cabitaanka, karinta, iyo nadaafadda aasaasiga ah. Haddii aad xoolo leedahay, waxaad u baahan doontaa biyo dheeraad ah.

Talooyin ku saabsan waxaad samayn karto:

- Isticmaal masaxaha qoyan iyo gacmo nadiifiyaha si aad u nadiifiso nafsadaada inta aad isticmaali laheyd biyaha.
- Soo ogoow meesha aad ka soo dhaansan karto biyaha.
- Uruuri biyaha roobka si loogu dhaqo weelasha, dhar dhaqida, iyo nadaafadda.
- Ku qabooji dhalooyinka PET oo ay ka buuxaan biyo (ka tag meel hawo ah). Waxay u shaqeeyaan sidii biyo kayd ah iyo sida barafka ah.

Waxyaabaha wanaagsan ee lagu hayo guriga:

- Biyaha lagu cabbo weel nadiif ah ugu yaraan hal toddobaad, oo lagu kaydiyo meel qabow oo mugdi ah. Biyaha waa la kaydin karaa ilaa inta ay dhadhankooda ama urkooda iskabadalo. Caado ka dhig inaad biyaha mar ama laba jeer hubiso sannadkii iyo inaad beddasho haddii loo baahdo.
- Weel faaruq ah, oo nadiif ah oo biyaha lagaga ururiyo meelaha ay degmadu u qoondaysay.
- Biyaha macdanta ee ku jira dhalooyinka PET.
- Taarikada la tuuri karo iyo qalabka wax lagu gooyo.



XUSUUSNOW!

Hayso xal musqul ah oo kayd ah, sida baaldi leh bacda qashinka iyo daboolka.

Khatarta sii deynta walxaha halista ah

Is-maamulka Borlänge, waxyaabaha khatarta ah sida kiimikooyinka sunta ah ama kuwa dabka kicin kara waxaa loo maareeyaa si fiican waxaana loo qaadaa si habboon. Shilalka ku lug leh walxahan waxay u keeni karaan waxyeelo halis ah dadka iyo deegaanka. Sababtan awgeed, shuruudo adag oo badbaado iyo tallaabooyin ka hortag ah ayaa lagu soo rogay kuwa mas'uulka ka ah.

Soo ogaaw haddii aad ku nooshahay ama aad ka shaqayso meel u dhow xarun ka shaqaysa walxaha halista ah adigoo isticmaalaya bogga degmada, borlange.se.


Gaadiid

Badeecooyin aad u badan oo khatar ah ayaa sidoo kale loo daabulayaa Borlänge oo ay weheliyaan wadooyin cayiman iyo tareeno. Waxaad ku garan kartaa baabuurta qaadaya alaabta khatarta ah calaamadaha waaweyn iyo/ama calamadaha baabuurta, gaadhiyada, ama weelasha tilmaamaya waxa ku jira.

Haddii shil ku lug leh walxaha khatarta ahi uu dhaco:

- Soo ogow waxa dhacay oo kala soco VMA raadiyaha, TV-ga, app-ka 112, iyo borlange.se.
- Gudaha joog daaqadaha iyo albaabaduba xiran yihiin. Iska ilaali qiqa iyo daruuraha gaaska.

Haddii aad aragto shil, wac 112.



Xusuusnow!

Haddii shil ku lug leh walxaha khatarta ah uu ka dhaco meel ku dhow ilaalinta biyaha, aad buu u daran yahay sababtoo ah waxay khatar ku tahay biyaha cabitaanka ee dad badan. Isla markiiba la xidhiidh 112.

Biyo badan oo qulqulaya iyo biya xireenka oo xumaaday

Inta lagu jiro gu'ga iyo deyrta, khatarta qulqulka biyaha oo sarreeya ayaa kordha, oo loo yaqaan fatahaadaha gu'ga iyo daadadka dayrta. Tani waxay sababi kartaa daadad, gaar ahaan agagaarka Webiga Dalälven laakiin sidoo kale Tunaån iyo Runn. Torsång, Sunnanö, Norr Amsberg, iyo Ornäs ayaa sidoo kale laga yaabaa

inay saameeyso.

Dalälven, oo mara Borlänge, waa mid ka mid ah webiyada ugu waaweyn Iswiidhan oo leh meelo badan oo biyo-xireenno ah. Khatarta biyo-xireenku waa mid aad u yar, laakiin haddii jebin wey ey dhacdo, fatahaad ballaaran ayaa ka dhici karta webiga agtiisa. Tusaale ahaan, haddii biyo-xireenka Trängslet ee Älvdalen uu xumaado, biyaha fatahaadda waxay gaadhi karaan Borlänge muddo u dhexeysa 18–20 saacadood gudahood.

Talooyin ku saabsan waxaad samayn karto:

- Ka fikir meel kale oo aad aadi karto haddii aad u baahan tahay inaad ka baxdo gurigaaga.
- Xir daaqaadaha iyo daloolada dhulka hoostiisa oo xidh bullaacadaha iyo musqulaha.
- Dhiso xanibaad ciid ama carro ah oo ku wareegsan agagaarka gurigaaga.
- Ka fogow inaad lugayso ama baabuur wadid meelaha daadku qaaday.

[Lansstyrelsen.se/dalarna](https://lansstyrelsen.se/dalarna) waxaad ka akhrisan kartaa wax badan oo ku saabsan qulqulka biyaha ee hada iyo warbixinta saadaasha gobolka.

Mas'uuliyaddaada mulkiile guri ahaan

Milkiile guri ahaan, adiga ayaa mas'uul ka ah inaad qaado tillaabooyin ka hortag ah iyo inaad u diyaargarowdo inaad dhowrto hantidaada. Wax badan ka akhri krisinformation.se oo ku saabsan waxa aad samayn karto ka hor, inta lagu gudo jiro, iyo ka dib marka daadka dhaco.

Waxyaabaha wanaagsan ee lagu hayo guriga:

- Bacaha ciidda ama bacaha biyaha nuuga.
- Bamka biyaha ka saara guriga.
- Bacaha ama jawaannada aan biyaha sii deynin si loo ilaaliyo alaabta iyo dukumentiyada muhiimka ah.
- Dharka biyaha kaa celinayo xidho haddii aad u baahan tahay inaad banaanka aadiid.

Xusuusnow!

Hubi in hantidaada ama ganacsigaagu leeyahay caymis saxda ah.



Waa sidee xaalada difaaca guud ee Iswiidhan?

Haddii Iswiidhan la soo weeraro, waa in aan dhammaanteen, intii karaankeenna ah, aan ka qayb qaadanno difaaca qarankeena – taas waxaa loo yaqaannaa wadajir difaaca qaranka. Difaaca qaranka waxa loogu talagalay in lagu ilaaliyo iyo in aan difaacno nabadda iyo xorriyadda dalkeena, iyo sidoo kale xaqa lagu noolaan karo si waafaqsan doorashadeena. Difaaca guud ee Iswiidhan wuxuu ka kooban yahay militariga iyo difaaca madaniga ah labadaba.

Xaalada feejignaanta oo sare loo qaaday

Waxaa laga yaabaa in loo diyaar garoobo in la kordhiyo si loo xoojiyo awoodda dalka uu isku difaaco. Dawladdu waxay go'aansan kartaa xaalad feejignaan ah oo la balaariyay, markaas, dhammaan bulshada waa inay iska kaashadaan sidii loo hubin lahaa in hawlaha ugu muhiimsan ay sii shaqeeyaan.

Ka akhriso wax badan oo ku saabsan diyaargarowga sareeyo msb.se

Xubinimada NATO

Tan iyo bishii Maarso 2024, Iswiidhan waxay xubin ka ahayd isbahaysiga gaashaandhigga ee NATO, taas oo xoojinaysa difaacayada qaranka.

Ka akhri wax badan oo ku saabsan NATO msb.se/nato

Goobaha hoyga degdegga ah

Heeganka difaaca madaniga ah ee Iswiidhan ayaa ilaaliyaa ummada dhamaantood xiliga dagaalka. Laguma meelayn hoy gaar ah laakiin waa inaad isticmaashaa midka kuugu dhow haddii lagu sheego weerar hubaysan.

Is-maamulka Borlänge waxaa ku yaal ku dhawaad 450 guri oo ay ku qoran yihiin calaamada fagaaraha liimiga ah oo leh saddex xagal buluug ah. Hoyga kuugu dhow waxaad ka heli kartaa websaydka MSB: msb.se/skyddsrum.

Hoyga waxaa loo isticmaali karaa kayd ahaan xiliga nabadda, laakiin milkiilayaasha hantida waa in ay ku diyaariyaan 48 saacadood gudahood haddii ay dhacdo dagaal ama iskahorimaad weerar hubaysan.

Maskaxda ku hay in, booska xaddidan iyo xasaasiyadda awgeed, xayawaanka aan loo oggolayn hoyga – laakiin eeyaha haga waa la soo dhaweynayaa.



Wajibbaadka difaaca qaran

Iswiidhan, guud ahaanba waajibbaadka difaaca ayaa khuseeya, iyo waxaana lagugu darayaa haddii aad:

- Inta dadoodu u dhaxaysa 16 iyo 70 sano jir.
- Muwaadin Iswiidhish ah oo degan Iswiidhan ama dibadda.
- Qofka ajnabiga ah ee degan Sweden.

Taasi macneheedu waxa weeye haddii loo baahdo, waxaa waajib kugu ah inaad gacan ka geysato oo aad wax ku darsato waxa loo baahan yahay si aad u diyaariso oo aad u difaacdo Iswiidhan marka ay dagaal ama khatar dagaalka.

Waxa jira saddex nooc oo ah waajibbaadka difaaca qaran:

- **Adeeg ciidan** – ciidamada dhexdooda, ka qayb qaadashada difaaca dalka inta lagu jiro dagaal ama khatarta dagaalka.
- **Shaqaaale dawladeed** – dhiggiisa rayidka ah ee adeegga milatariga, hubinta in hawlaha muhiimka ah ee bulshada, sida adeegyada samatabbixinta, ay sii wadaan inay shaqeeyaan inta lagu jiro feejignaanta sare ama dagaalka.
- **Adeegga guud ee qaranka** – Waxay khusaysaa haddii ay dawladdu go'aansato, oo macnaheedu yahay waa inaad sii wadato shaqadaada caadiga ah ama aad qabato hawlo kale oo muhiim ah oo u adeegaya difaaca qaranka. Xafiiska Shaqada Dadweynaha ee Iswiidhan ayaa kuu qoondeynaysa meesh aad ka lagaaga baahan yahay.

Ma ogtahay?

Xilliga dagaalka, dhammaanteen waa in aan wax ku darsanno intii karaankeenna ah!

Meelaynta xiliga dagaalka – maxay ka dhigan tahay?

Haddii lagu qoondeeyo meelaynta xiliga dagaalka, waa inaad u adeegtaa difaac qaranka inta lagu jiro feejignaanta sare ama dagaalka, iyadoon loo eegin shaqo kale. Meelaynta xiliga dagaalku waa qiyaas diyaarin ah oo loogu talagalay in lagu sugo hawlaha bulshada ee muhiimka ah. Waxay ku dhici kartaa shaqo ama qayb ka mid ah adeegga milatariga. Haddii aadan hubin inaad leedahay meelayn xiliga dagaalka, la xidhiidh cidada aad u shaqayso ama Hay'adda qorista Difaaca Iswiidhan (Plikt och prövningsverket).



Loogu talagalay dadka baahiyaha gaarka ah qaba

Marka ay dhibaato jirto, waxa si gaar ah muhiim u ah, haddii aad baahiyo gaar ah qabto, in aad diyaar u tahay. Ka fikir nooca gargaarka aad u baahan karto oo wargeli dadka kugu dhow. Markaad hore u sii diyaargarowdo oo aad ogaato taageerada la heli karo, way fududaanaysaa inaad si badbaado leh oo madax-bannaan wax u qabato. Hoos waxaa ku yaal tusaalooyin talobixin ah oo ka socda krisinformation.se iyo MSB oo kordhin kara badbaadadaada marka xiisadda jirto.

Talo ku socota dadka indha la'aanta ah iyo kuwa aragga naafada ka ah

- Si joogto ah u isticmaal caawiyaha codka taleefankaaga gacanta. Tani waxay kuu sahlaysaa inaad ku tiirsato xitaa markaad diiqad ku jirto.
- Ku calaamadee walxaha muhiimka ah farta indhoolayaasha ama qoraal cad.
- U deji raadiyaha ku shaqeeya aalada kanaalka bateriga P4 oo ka dhig mid la heli karo.
- Xawayanka eyga ee hagitaanka iyo caawinta waa loo ogolyahay hoyga.
- U ogolow qof kuu dhow, sida deriska, inuu ogaado inaad u baahan tahay caawimaad marka ay dhibaato dhacdo.

Talo ku socota kuwa maqalka la' ama dhegaha adag

- Ku keydi macluumaadka caafimaadka iyo xiriirada degdega ah taleefankaaga gacanta. Sheeg haddii aad maqalka la'dahay ama aad u baahan tahay turjumaan luqadda dhegoolaha.
- Horay iskaga diwaangeli sosalarm.se si aad u awooddo inaad uga digto 112 SMS.
- Adeegso telefonada qoraalka ah, taleefoonka fiidiyowga, ama adeegyada gudbinta hadalka si aad ula xiriirto maamulka iyo ururada.
- Soo degso SOS Alarm app iyo krisinformation.se. Ogeysiisyada firfircoon ee digniinaha dadweynaha (VMA).
- Ku tiirsanow xogta rasmiga ah. Ha faafin wax aan la hubin, maadaama macluumaadka beenta ah iyo marin habaabinta ay caan ku yihiin waqtiyada dhibaatooyinka ama dagaalka.

Tallo!

La qabso u
diyaargarooogaaga
baahiyahaaga!

Talo ku socota dadka curyaaminta ah

- Ma isticmaasha kursi curyaan oo koronto ku shaqeeya? Isku day in aad haysato kursiga curyaanka gacanta ee miisaanka fudud si uu kayd ugu noqdo haddii kan korontada aan la isticmaali karin.
- Haddii aad isticmaashid barkinta fadhiga, soo qaado marka la qaxayo, xataa haddii lagugu khasbo inaad ka tagto kursiga curyaanka.
- Guriga dhigo qalab dheeraad ah oo kaa caawinaya dhaqdhaqaaqa guriga dhexdiisa, sida bakooraad ama lugeeyaha, si aad u hesho dabacsanaan dheeraad ah.
- Ku kayd qalabka farsamada guriga oo aad u baahan karto si aad isku dheelitirto ama u hagaajiso qalabkaaga, sida furaha.
- Llaysku wuxuu xoreeyaa gacmahaaga wuxuuna faa'iido leeyahay inta ay korontadu go'an tahay.
- Firimbi dhigo meel aad gaadhi karto si aad u dirsato caawimo.



U diyaarsanaantaada iyo u diyaargarowgaaga maskaxeed

Inta lagu jiro xiisadda, kaalmada waxaa laga yaabaa in dib loo dhigo maadaama ay degmadu mudnaanta siiso kuwa aadka u tabar daran. Sidaa owgeed, qorshee inaad awoodo inaad siiso biyo, kulayl, cunto, iyo isgaadhsiin naftaada muddo wakhti ah. Sida ay muhiimka u tahay in maskax ahaan loo diyaargarooobo – ku dhiiran inaad ka fikirto xaaladaha adag oo aad diyaar u ahaato marka ay dhacdo wax lama filaan ah.

Qorshayso diyaargarowgaaga ku salaysan baahidaada iyo mida qoyskaaga. Ha iloobin daawooyinka iyo gargaarka degdegga ah. Ku hay lacag caddaan ah qaybo yaryar haddii ay dhacdo bixinta kaadhka iyo ATM-yada ay joojiyaan shaqada. Sidoo kale xusuusnow inaad qorsheyso cunto, biyo, iyo qalabka lagama maarmaanka ah haddii aad haysato xayawaanka ladhagdo. Ka akhriso wax badan oo ku saabsan sida loo qorsheeyo diyaargarowgaaga bogga degmada borlange.se.

Markaad qorshayso, la hadasho dadka kale, oo aad samayso qorshe fudud, waxaad yaraynaysaa khatarta ah inaad noqoto mid aan qarsoonayn marka xiisadda jirto. In maskax ahaan loo diyaar garoobo waxay muhiim utahay sida inaad biyo iyo cunto guriga ku haysato. Ma aha in la cabsado, laakiin awoodo u lahaanshaha qorsheeynta, wax ka qabto, oo la is caawiyo marka loo baahdo.

Ka fikir sida aad ugu noolaan kartid xaaladaha kala duduwan

Si furan ugala hadal diyaargarowga kuwa kuugu dhow

Baro inaad is dejiso iyo inaad xoogga saartid tallaabada xigta

Aqbal in dhibaato ay dhici karto

Ku kalsoonow kartidaada aad ku maarayn karto xaaladaha adag

Qorshe fudud u samee naftaada iyo qoyskaaga

Faahfaahinta xogta xiriirka

Hadda, waxaad rajaynaysaa inaad si fiican u fahanto waxa dhici kara iyo waxaad samayn karto si aad ugu diyaargarowdo si aad u caawiso kuwa kale. Hoos waxaan ku soo aruurinay xog muhiim ah ee xiriirka si aad gacanta ugu hayso haddii ay dhibaato ama dhacdo kale oo halis ah ka dhacdo Borlänge.



Qaylo-dhaanta SOS

Gargaarka degdega ah ee xaaladaha degdega ah

☎ 112

sosalarm.se



Booliiska

Xogta iyo warbixinta

☎ 114 14

polisen.se



Lambarka xogta qaranka

Dhibaatooyinka iyo shilalka

☎ 113 13

krisinformation.se



Xarunta Warbixinta Sunta

Xogta sunta

☎ 010-456 67 00

giftinformation.se



Adeegga talada

daryeelka caafimaadka

Wixii talo iyo macluumaad caafimaad ah

☎ 1177

1177.se




Gobolka Dalarna

Xog ku saabsan caafimaadka iyo daryeelka caafimaadka ee gobolka

☎ 023-49 00 00

regiondalarna.se



Adeegga Samatabbixinta Dala Mitt

Wixii xog iyo talo ah

☎ 023-48 88 00

dalamitt.se



Borlänge Energi AB

Xog ku saabsan hakadka socda iyo go'annada korontada, qashinka, kuleylinta degmada, fiber, biyaha, iyo bullaacadaha

☎ 0243-730 00

borlange-energi.se



Svenska Blå Stjärnan (Xiddiga Buluugga ah ee Iswidishka)

Xog iyo talo ku saabsan u diyaargarowga xayawaanka la dhaqdo


☎ 08-425 030 40

svenskablastjarnan.se

Ugu dambayn

Mid ka mid ah
hantidayada ugu
weyn marka ay wax
nagu dhacaan ayaa
rabitaankayaga yahay
inaan is caawino!

Xog kaa caawinaya inaad maareyso dhibaatooyinka.



borlange.se/beredskap

Buug yar oo wanaagsan oo la hayo.

